



City of Boston
Mayor Michelle Wu
Mayor's Office for Immigrant Advancement

MAGAALADA BOSTON WAXAY HESHAY AQOONSIGA 4-STAR EE CERTIFIED WELCOMING

Magaaladii ugu horreysay ee Massachusetts ee loo aqoonsado Certified Welcoming.

BOSTON – Isniin, Agoosto 17, 2026 – Duqa Magaalada Michelle Wu, Xafiiska Duqa Magaalada u qaabilsan Horumarinta Muhaajiriinta (Mayor's Office for Immigrant Advancement, MOIA), iyo Welcoming America ayaa ku dhawaaqay in Magaalada Boston ay heshay aqoonsiga 4-star ah ee [Certified Welcoming](#) oo ay bixisay [Welcoming America](#), taas oo Boston ku aqoonsanaysa inay tahay hoggaamiye heer qaran ah oo ku aaddan dejinta siyaasado, barnaamijyo iyo hab-dhaqanno taageera ka-qaybgalka iyo dareenka ka-mid-noqoshada muhaajiriinta.

“Boston weligeed waxay ahayd magaalo ay qaabeeyeen dad ka kala yimid daafaha dunida, kuwaas oo halkaan u yimid inay mustaqbal ka wanaagsan u dhisaan naftooda, qoysaskooda iyo bulshooyinkooda,” ayay tiri **Duqa Magaalada Michelle Wu**. “Waxaan ku faraxsanahay inaan helno aqoonsigaan taariikhiga ah, kaas oo muujinaya horumarka la sameeyay iyo shaqada joogtada ah ee ka socota guud ahaan magaaladeenna si Boston looga dhigo guri uu qof walba leeyahay. Waxaan u mahadcelinayaa Xafiiskeena Horumarinta Muhaajiriinta, bah-wadaagta bulshada, iyo hoggaamiyaasha xaafadaha iyo dhaqanka, kuwaas oo naga caawiyay inaan gaarno tallaabadaan muhiimka ah, iyadoo aan sii wadno dadaalladeenna horumarineed.”

Iyadoo loo marayo hannaankeeda Certified Welcoming, Boston waxay buuxisay shuruudaha dhammaan toddobada dhinac ee [Welcoming Standard](#), oo ah hagaha ay Welcoming America u dejisay dhisidda bulshooyin loo dhan yahay: hoggaanka dowladda iyo bulshada, helitaan loo siman yahay, ka-qaybgalka madaniga ah, bulshooyin isku xiran, waxbarashada, horumarinta dhaqaalaha, iyo bulshooyin ammaan ah.

Aqoonsigaan wuxuu ku dhisan yahay dadaallada joogtada ah ee MOIA, gaar ahaan hindisaha City of Belonging “You Belong Here”, oo ah olole magaalada oo dhan ka socda, kaas oo dhiirrigeliya in qof kasta oo magaalada deggan uu dareemo in la soo dhoweynayo, la qadarinayo, isla markaana uu awood u leeyahay inuu gacan ka geysto mustaqbalka Boston. Aqoonsigaan wuxuu ka tarjumayaa wax ka badan ballanqaad astaan ah — Boston waxay dhistay nidaamyo, barnaamijyo iyo iskaashi ka caawiya dadka muddada dheer magaalada u degganaa iyo dadka cusubba inay si buuxda uga qaybqaataan nolosha bulshada isla markaana horumar sameeyaan.



City of Boston
Mayor Michelle Wu
Mayor's Office for Immigrant Advancement

Iyada oo loo marayo dabbaaldeegga sannadlaha ah ee [Welcoming Week](#) ee bisha Sebtembar, MOIA waxay sidoo kale sii waddaa dadaalladeeda wacyigelinta ee magaalada oo dhan, si ay dadka deggan ugu wargeliso una la wadaagto khayraadka la heli karo, si deris kasta loogu dhiirrigeliyo inuu gacan ka geysto dhisidda xaafado soo dhoweyn leh.

“Xoogga Boston wuxuu ka yimaadaa dadka magaaladan u yaqaan gurigooda, oo ay ku jiraan deriskeenna muhaajiriinta ah, kuwaas oo ka qaybqaata dhammaan dhinacyada nolosheena bulsho, dhaqan iyo dhaqaale,” ayay tiri **Madaxa Sinnaanta iyo Ka-qaybgalka Mariangely Solis**. “Aqoonsigaan wuxuu ka tarjumayaa sida ay nooga go’an tahay inaan sii wadno dhisidda magaalo ay helitaanka adeegyada luuqadeed, fursadaha dhaqaale, iyo ka-mid-noqoshadu si qoto dheer ugu dhex milan yihiin habka aan ugu adeegno dadka deggan magaalada.”

Iyadoo qayb ka ah hannaanka Certified Welcoming, MOIA waxay hoggaamisay dib-u-eegis dhammaystiran oo lagu sameeyay siyaasadaha, barnaamijyada, iyo hab-dhaqannada Magaalada ee la xiriira ka-mid-noqoshada muhaajiriinta. Hannaanku wuxuu iftiimiyay maalgelinta ay Boston ku bixisay helitaanka adeegyada luuqadeed, horumarinta hoggaanka muhaajiriinta, adeegyada sharciga, horumarinta xirfadaha shaqaalaha, ka-qaybgalka bulshada, iyo iskaashiga ay la leedahay ururrada u adeega dadka deggan magaalada ee muhaajiriinta ah.

“Helitaanka heerkani 4-star ah ee Certified Welcoming wuxuu ka dhashay dadaal iskaashi oo ka dhexeeya dhammaan waaxyaha dowladda Magaalada iyo bulshooyinka muhaajiriinta ah, kuwaas oo nala wadaagay waayo-aragnimadooda, mudnaanta ay siinayaan arrimaha kala duwan, iyo aragtidooda ku aaddan mustaqbalka Boston,” ayay tiri **Courtney White, Agaasimaha Ku-meelgaarka ah ee Fulinta Xafiiska Duqa Magaalada u qaabilsan Horumarinta Muhaajiriinta**.

“Aqoonsigaan wuxuu xusayaa horumarka aan sameynay, iyadoo sidoo kale xoojinaya sida ay nooga go’an tahay inaan sii wadno dhisidda magaalo uu qof kasta oo muhaajir ah oo deggan uu si siman uga heli karo khayraadka iyo adeegyada, si buuxda uga qaybqaadan karo, isla markaana uu si dhab ah u dareemi karo inuu ka tirsan yahay bulshada.”

Bulshooyinka muhaajiriinta ah ee Boston waxay ka tarjumayaan kala-duwanaanshaha, adkeysiga, iyo hal-abuurka xoojiya awoodda magaalada. Iyadoo loo marayo barnaamijyo iyo hindisayaal ay ka mid yihiin barnaamijyada horumarinta hoggaanka muhaajiriinta, deeqaha bulshada, iskaashiyada adeegyada



sharciga, taageerada helitaanka jinsiyadda, iyo dadaallada ka-qaybgalka bulshada, MOIA waxay ka shaqaysaa horumarinta sinnaanta iyo ballaarinta fursadaha ay heli karaan dadka deggan magaalada ee muhaajiriinta ah.

“Shaqada Boston ee horseedday aqoonsigaan, oo ay si wadajir ah uga qaybqaateen dowladda magaalada, ururrada bulshada, iyo dadka deggan magaalada ee muhaajiriinta ah ee ka qayb qaatay qaabayntiisa, ayaa tusaale dhab ah u ah sida soo-dhoweyntu ficil ahaan u muuqato,” ayuu yiri **Daniel Valdez, Agaasime Ku-xigeenka Welcoming America**. “Waa arrin ku habboon in tani ay ku soo beeganto sannad-guurada 250-aad ee Ameerika, halkan oo ah goobtii uu ka billowday Kacaankii Mareykanka.” Waxaan ku faraxsanahay inaan Boston u aqoonsanno inay tahay bulshadii ugu horreysay ee Massachusetts ee hesha aqoonsiga Certified Welcoming, waxaana aad ugu faraxsanahay inaan aragno waxa xiga ee imaan doona.”

Aqoonsiga 4-star ee Certified Welcoming ee ay bixisay Welcoming America wuxuu ku biirayaa liis sii kordhaya oo aqoonsiyo iyo guulo muhiim ah oo muujinaya in Boston ay tahay guri uu qof walba leeyahay. Guulahaas waxaa ka mid ah dadaallada ay MOIA fulisay:

- Ballaarinta helitaanka adeegyada sharciga socdaalka iyadoo la taageerayo ururrada bulshada ee lagu kalsoon yahay ee bixiya kaalmada sharci ee bilaashka ah iyo midda qiime jaban.
- Taageeridda barnaamijyada English for Speakers of Other Languages (English for Speakers of Other Languages, ESOL), kuwaas oo ka caawiya dadka deggan magaalada ee muhaajiriinta ah inay horumariyaan xirfadahooda luuqadeed, ka faa'iidaystaan fursadaha waxbarasho, isla markaana xoojiyaan horumarkooda dhaqaale.
- Daahfurka iyo ballaarinta Immigrants Lead Boston, oo ah barnaamij hoggaamineed oo tababaray dadka muhaajiriinta ah ee deggan xaafadaha kala duwan ee Boston si ay u noqdaan hoggaamiyeyaasha bulshada.
- Abuurista fursado loogu talagalay dhallinyarada muhaajiriinta ah iyada oo loo marayo barnaamijka Immigrant Youth Advancement, kaas oo dhallinyarada magaalada deggan ku xira fursadaha sahmdinta xirfadaha shaqo, hagidda xirfadeed, horumarinta hoggaaminta, iyo fursadaha shaqo.
- Xoojinta ka-qaybgalka bulshada iyada oo loo marayo hindisayaal ay ka mid yihiin Community Office Hours, halkaas oo MOIA ay adeegyada iyo khayraadka Magaalada si toos ah ugu gaarsiiso xaafadaha iyada oo adeegsanaysa laamaha Maktabadda Dadweynaha Boston.



City of Boston
Mayor Michelle Wu
Mayor's Office for Immigrant Advancement

- Horumarinta dadaallada Magaalada ee helitaanka adeegyada luuqadeed, si dadka deggan ay u heli karaan adeegyada dowladda, macluumaadka, iyo ilaha, iyadoon loo eegin luqadda ay ku hadlaan.

Laga bilaabo 10 ka ilaa 19 ka Sebteembar, Welcoming Week ee Boston waxaa ka mid noqon doona barnaamijyo la xiriiira farshaxanka, caafimaadka, waxbarashada, iyo dhaqaalaha, iyo sidoo kale munaasabado lagu qabanayo internetka iyo kuwa si toos ah loogu soo xaadiro, si loo sii xoojiyo wacyigelinta ku saabsan Adeegyada Magaalada iyo toddobada dhinac ee Welcoming Standard. Si aad u aragto jadwalka munaasabadaha, booqo: www.boston.gov/welcoming.

###

Xog ku Saabsan Xafiiska Duqa Magaalada u qaabilsan Horumarinta Muhaajiriinta

Xafiiska Duqa Magaalada u qaabilsan Horumarinta Muhaajiriinta (MOIA) wuxuu ku dadaalaa xoojinta awoodda muhaajiriinta si ay si buuxda oo siman uga qaybqaataan nolosha dhaqaale, bulsho, madani iyo dhaqan ee Boston. MOIA waxay sidoo kale kor u qaaddaa aqoonsiga iyo fahamka dadweynaha ee ku aaddan kaalinta ay muhaajiriintu ku leeyihiin Magaalada. Si aad wax badan uga ogaato, booqo: boston.gov/immigrants.

Ku Saabsan Welcoming America

Welcoming America waa urur aan macaash doon ahayn oo aan xisbi siyaasadeed ku xirnayn, kaas oo hoggaamiya dhaqdhaqaaq lagu dhisayo bulshooyin loo dhan yahay oo barwaaqo badan, iyadoo la hubinayo in qof walba uu dareemo inuu ka tirsan yahay. Waxaan aaminsanahay in dhammaan dadka, oo ay ku jiraan muhaajiriintu, ay yihiin ka-qaybqaadayaal qiimo leh oo laf-dhabar u ah guusha bulshooyinkeenna iyo mustaqbalka aynu wadaagno. Si aad wax badan uga ogaato, booqo: welcomingamerica.org.

Xog ku Saabsan Certified Welcoming

Certified Welcoming waa aqoonsi rasmi ah oo la siiyo dowladaha hoose ee dejiyay siyaasado iyo barnaamijyo ka tarjumaya qiyamkooda iyo sida ay uga go'an tahay in muhaajiriinta si buuxda loogu daro bulshada. Barnaamijkaan hal-abuurka leh wuxuu qiimeeyaa dadaallada ay dowladaha hoose ku bixiyaan ka-qaybgelinta iyo soo-dhoweynta muhaajiriinta dhammaan dhinacyada nolosha madaniga ah, bulsheed iyo dhaqaale ee bulshooyinkooda. Marka bulsho la siiyo aqoonsiga Certified Welcoming, waxay muujinaysaa dadaallada ay heer deegaan ka sameysay, waxayna helayaa fursad ay kaga faa'iidayso tartanka, iyo sidoo kale fursado ay ku wadaagto hab-dhaqannadeeda soo-dhoweynta heer gobol, heer qaran iyo heer caalami. Si aad wax badan uga ogaato, booqo: certifiedwelcoming.org.